ALLIANCE
ACTion
INFORMATION SHEETS

Caawimaada Iskuulka ee Waafajinta iyo Hab doorinta

School Accommodations and Modifications — Somali version

Ardada qarkood ee aan cafimaadkooda fiicnayn ama lagu qiyaso in ay laxaadka la'ahiyiin (disabilities) waxa ay u baahanyahiin caawimaad waafajin iyo hab doorin xaga waxbarashada ah si ay horumar uga gaaraan dugsiga. Sharciga ka yaala waxbarashada xaga dadka naafada ah (IDEA), waxa uu na farayaa in aysan jirin tafsiiro noo fasiraya waxa ay cawimaadaa tahay ama ay ku kooban tahay. Hase ahatee, waxa jirta garasho guud oo la isla garan karo waxa ay caawimaadas tahay.

Waafajintu waxay u ogolaataa ardayga in uu ku dhameeyo darasadda waqti macquul ah loogu tala galay ardada kale ee caadiga ah. Waafajintu waxay noqon kartaa mid waqti ah oo waqtiga loo dhereeya, casharka oo si nooc kale ah loogu qora, waqti ka duwan waqtiga ardada kale in loo masaamaxa, meel ka duwan meesha ardayda kale ku qaadanaysa casharka in loo ogalaado, amaba si nuuc kale ah loogu sharaxo. Waafajintu micnaheedu ma aha in casharka ama imtixaanka la bedelaa ama loo fududeyaa adrayga. Tusaalo waafajin waxaan uga soo qaadan karnaa arday indhaha la'a ee imtixaan qaadanaya. Waxaa ardaygaa loo ogaladaa in uu isticmalo qalabka gacmaha lagu dareemo si uu u aqriyo imtixaanka.

Hab doorinta waa mid casharka ama intixaanka bedeleysa. Waxay dhalan rogaysaa casharka ama imtixaanka sidii uu u qornaa ama siduu ku qiyaasnaa. Waxaan tusaalo uga soo qadan karnaa hab doorinta: a) arday loo ogalaado in uu qaato keliya qeyb ka mid ah casharka ay ardayda kale qaadanayso; b) arday loo ogolado in uu qaato cashar gebigiiba ka duwan casharka ardayda kale qadanaysa oo aan isku heer ahayn casharada kale.

Waafajinta ama hab doorinta loo samaynayo ardayga, waa in uu ku qornaadaa qoraalada qorshaha waxbarashada gaarahaaneed Individualized Education Program (IEP) ee ardaygu leeyahay.

Ilmaha qarkood ee aan cafimadkooda aad u liidan waxa laga yabaa in aysan u baahan waxbarashada gaarahaneed. Ilmahaa waxaa loo doori karaa qaybta qorshaha 504. Qaybta qorshaha 504 waa sharci ay soo dejisay dowlada federalka ah. Sharcigaas oo mamnuucaya in la midabtakooro dadka laxaadka la'a ama dib u dhaca leh (disabilities). Marka la qorsheynayo qeybta qorshaha 504, waxaa mid mid loo texgeliyaa waxyaabaha ama qorshaha uu ilmuhu u bahan yahay in laga bedelo ama ay ka duwanadaan ardayda caadiga ah si ey guuleystaan waxbarashada. Bedelkaa waa in uu ku xusnadaa oo keliya halka uu ilmuhu la'a yahay iyo waxa uu u bahanyahay. Marka laga tashanayo waafajinta iyo hab doorinta, waa muhiim in uu ardayga ka qeyb qataa hadii ay u banaantahay. Talaabada ugu horeysa waxay tahay in la weydiiyo ilmaha sida looga caawini kara waxbarashada iyo waxyaabaha ay dhibsanayaan.

Halkan hoose waxaan tusaalooyin ugu soo qadan doonaa, qaar ka mid ah waafajinta iyo hab doorinta. Waa fikrado lagu caawini kara xaga waxbarashada ardayda laxaadka la'a ama dib u dhaca leh. Waxaad xasuusnataa waafajin walba iyo hab doorin walba oo ay kooxda qorshaha waxbarashada gaar ahaneed (IEP) ama koxda qaybta 504 qoraan, waa in uu ahadaa mid ku xusan oo loo qadariyey keliya ardayga halka uu la'ayahay. Si ay ugu fududataa waxbarashada. Waafajinta iyo hab doorinta ardayga loo sameynaya waa in lagu daraa qorshaha iyadoo qoraal ah.

Bugaagta waxbarashada iyo Manaahijta Dugsiga (Textbooks and Currriculum)

Bugaagta

- ☐ Waa in la siyaa bugaag la heer ah bugagta kale lakiin ka sahlan aqrintooda.
- ☐ Waa in la siyaa cajalado la dhageysta si uu ardayga uga dhageysto casharka marka loo aqrinayo.
- ☐ Waa in la siyaa qayb walba oo buuga casharka ka mid ah iyadoo la soo kobay.
- ☐ Waa in la siyaa qoraalo uu ardayga ka helayo kana saraysa ardayga kalsoonidiisa.

Technical Assistance ALLIANCE for Parent Centers
8161 Normandale Blvd.
Minneapolis, MN 55437-1044
952.838.9000
952.838.0190 TTY
952.838.0199 fax
888.248.0822 National Toll-free
alliance@taalliance.org
www.taalliance.org

©2007 PACER Center |

- ☐ Waa in lagu dhiira geliyaa arday kale oo ay wax la aqristaan.
- ☐ Waa in loo calameeyaa qeybaha muhiimka ah ee casharka.
- ☐ Waa in la tusaa sida loo buuxiya kelmadaha.
- ☐ Waa in la siyaa labo buug oo nooc walba ah si ay ardada xasuustoodu liidato midna iskuulka u yaalo midna guriga ugu haystaan.
- ☐ Waa in la tusaa sida waraaq gooni ah loogu qoro waxyaabaha muhiimka ah.
- ☐ Waa in la siyaa tiro suaalo ah oo ay ka sii fikiraan inteysan aqrin casharada si ay uga doodaan marka ay aqriyaan kadib.
- ☐ Waa in la siyaa tirada baalka buuga ay ka heli karaan jawaabta su'alaha ay qabaan.
- ☐ Waa in la siyaa casharada iyagoo far waaweyn ku qoran ama qoraalada loogu talagalay dadka indhaha la'a ee dareenka gacmaha wax ku aqriyo.

Manhajadda (Curriclum)

- ☐ Waa in loo soo gabiyaa casharada iyadoo loo mujinaya laguna taqsuusayo meelaha muhiimka ah.
- ☐ Waa in loo soo gaabiyaa imtixanada hingaada ah kelmadaha muhiimka moyee.
- ☐ Qoraalada qarkood waa in la tusaa iyagoon qoraal ahayn (iyagoo dhoob laga sameyay, iyagoo sawiro waraaq weyn lagu daabacay ah)
- ☐ Waa in uu baraha ogaadaa dibna ugu noqdaa marwalba waxyaabaha ardaygu u bahanyahay si uu ugu guuleysto waxbarashada.
- ☐ Baruhu waa in uu u hab dooriyaa casharada laga doonayo ardayga si uu ardaygu u fahmo. Waa in uu ardayga ka jawaabi karaa sua'alaha ka yimaada cashrka marka uu aqriyo kadib.
- ☐ Ha siin qoraalo aad u dhaadheer, ugu bedel qoraalo gaabgaaban ama qoraalo uu ka daawan karo cajalado. Dabadeedna wax ka qori karo ama uu ka hadli karo.

Jawiga Fasalka (Classroom Enviroment)

- ☐ Waa in sii joogto ah loogu noqdaa sharciyada fasalka.
- ☐ Waa in fasalka la qiimeyaa iyo sida uu jawigiisu u dhisan yahay.
- ☐ Waa in lage nadiifiyaa waxyaabaha aanan shaqo ku lahayn waxbarashada.
- ☐ Waa in amusnaanta loogu dadaalaa inta ay waxbarashada ugu muhiimsantahay.
- ☐ Waa in laga yareeyaa waxyaabaha ardada argtidooda mahinaya sida telefonka gacanta.
- ☐ Waa in loo fududeeyaa ardayga meel ay computer ka heli karaan si ay qoraalada ugu fuliyaan.
- ☐ Waa in la fadhiisiyaa ardayga meel baraha u dhow ama meel arday wanaagsan u dhow.
- ☐ Waa in la fadhiisiyaa ardayga meel ka fog albaabada iyo daaqadaha.
- ☐ Waa in la fadhiisiyaa meel uu ardayga si sahlan uga arki karo baraha, sabuurada iyo qalabka wax laga daawado.
- ☐ Waa in lka siyaa qalmaan iyo buugaag siyaado ah.
- ☐ Isticmaal kelmado kala duwan si aad ugu fududayso marka la isticmaalayo buuga kelmadaha lagu xaliyo (puzzle)
- ☐ U dhaxaysii in waasac ah miisaadka iyo kuraasta ardayda ku fariisato

Tilmaan Raac iyo Hawlo (Instruction and Assignments)

Tilmaamo (Directions)

- ☐ Isticmaal tilmaamo qoraal iyo afka ah.
- ☐ Marka aad tlimaanta bixineyso, u bixi si kooban oo sahlan.
- ☐ Tiro geli sida ay hawlahu isugu xigaan.
- ☐ Hubso in uu ardaygu fahamayo tilmaantaada. Ha ku dhawaaqaan tilmaanta hawsha.
- ☐ Tus tusalooyin aragti ah oo ay arki karaan.
- ☐ Tus tusaalo tusaysa casharkii oo laga shaqayay sida xisaabta oo kale.
- ☐ Istaag hal ka dhow ardayga marka aad hawl u dirayso ama tilmaan sinayso.

Waqtiga/Xilli Kalaguurka (Time and Transition)

- ☐ La socodsii ardayga marka ay hawsha is bedeleyso. Xasuusi ardayga dhowr goor in ay hawl kale bilaaban doonto.
- ☐ U ogolow waqti dheeraad ah si uu u dhameeyo hawsha.
- ☐ U masaamax waqti dheeraad ah uu casharka kaga shaqeeyaa marka uu guriga u qaato adigoon ciqaabin.
- ☐ Ku caawi marka uu doonayo in uu dugsiga gudahiisa ku socdaa.

Farqormada (Handwriting)

- ☐ Isticmaal qalab wax lagu qoro aanan qoritaan badan u bahnayn.

- ☐ Isticmaal sua'alo u baahan meelaha banaan buuxi si uusa qoritaanku u dheeraan.
- ☐ U raadi qof ka caawiya qoritaanka. Arday kale cashar qore uga dhig. Ama sawir uga qaad arday ama macalin casharka uu qoray. (ha ku haleyn in uu arday kale aanan cashar qoristiisu fiicnayn ama laheyn saaxiibo badan caawiyo)
- ☐ U qor waraaq gaaban oo soo koobaysa cajalada la daawado ama filinka waxa uu ka hadlayo.
- ☐ Si fasiix ah sabuurada ugu qor casharka laga hadlayo ama tilmaanta hawsha.
- ☐ U ogolow in uu ardaygu casharka cajalad ku duubto ama uu sawiro ka qaado si uu si sahlan uga jawaabi karo.

Qiiymeyn (Grading)

- ☐ Si joogto ah u qiimee casharada ama maalin walba qiimee si sanad dugsiyeedka u ogaan karto qiimaha iskucelceliska.
- ☐ Culeyska saar ardayga maalin walba shaqada uu qabanayo una qiimee haduusan imtixaanka ku fiicneyn.
- ☐ Waxaad calaamatu sax saartaa sua'alaha uu ardaygu saxay, intaad qalad saari lahayd kuwa uu qaladay.
- ☐ U ogolow ardayga in uu dib uga sii shaqayo su'alaha uu qalday si uu natiijyo fiican u helo.
- ☐ U qiimee su'alaha uu saxay marka uu dib uga sii shaqeeyo, ama isku celceliskooda.
- ☐ Isticmaal baasid ama dhicid ama wax la mid ah marka aad qiimeynayso.

Imtixaanada (Tests)

- ☐ Afka uga sharax imtixaanka inta aysan bilaabin iyo waxa aad ka doonayso.
- ☐ Bar ardayda sida imtixaannada loo qaato, (sida loo diyaariyo, sida dib loogu noqdo, sida waqtiga loo dhowro)
- ☐ Bar tiro kalmado ah iyo micnahooda.
- ☐ U masaamax waqtiga ay u baahan yihiin in ay imtixaanada ku dhameeyaan.
- ☐ Ka ilaali fasalka waxyaabaha ardayda maahinaya marka ay imtixaanka qaadanayan.
- ☐ U aqri imtixaanka ardayda una ogolow in ay afka uga jawaabi karaan.
- ☐ U kala qeybi imtixaanka qeybo yar yar oo ay xaliyaan.
- ☐ Qoritaan dheer intaad siin lahayd, isticmaal hab ay uga jawaabi karaan sax ama qalad, midee baa sax ah ama nocee baa la mid ah.
- ☐ U ogolow in ardaygu howl kale oo la mid ah imtixaanka oo imtixaanka u bedelaya sameyn karo.
- ☐ La socodsii horumarka uu ka garayo casharka ardayga intaad imtixaanka ku qiimeyn lahayd.
- ☐ Qiimee sida uu wax u hingaadiyo.
- ☐ Si fasiix ah oo makinada qoraalka ku qoran ugu diyaari imtixaanka.
- ☐ U ogolow in ay imtixaanka guriga u qaataan ama kutubka ka eegtaan jawaabaha.
- ☐ Su'alaha iyo dhowr jawaab u qor si ay mida ku haboon ugu buuxiyaan meelaha bannaan.
- ☐ Xuruufta ugu horeysa kelmada laga doonayo u qor si ay uga jawaabaan.

Xisaab (Math)

- ☐ U ogolow ardayda in ay isticmalaan xisaabiyaha gacanta.
- ☐ Isu qeybee xisaabaha isla mid ah (isku dhufashada oo dhan hal qeyb, isu qeybinta hal qeyb)
- ☐ Ku yaree xisaabaha xalinta ubaahan (4 ilaa iyo 6 xisaabaha xalinta u baahan baalkiba. Ha ku qorin 20 xisaabood ee xalin u baahan balkiba)
- ☐ U ogolow in ay ka shaqeyaan in yar oo xisaabaha xalinta u baahan si ay ugu guleystaan imtixaanka.
- ☐ Isticmaal waraaqo balaaran ee garaafka lugu qoro si ay u xaliyaan uguna koobnadaan waraaqda.
- ☐ U qor meel ay furaha xisaabta ka daawadaan si ay u xaliyaan.
- ☐ Ku qor tiro miiska ardayda.
- ☐ Si gaaban ugu qor xisaabaha laxaliya una aqri tariiqda xisaabaha inay xaliyaan u baahan.
- ☐ Isticmaal sawiro ama qariidado.

Kuwa Kale (Other)

- ☐ Isticmaal waraaqaha yar yar ee midabka huruuka ah si aad ugu calaamayso casharada kutubka.
- ☐ Ka warqab lana socodsii sida uu ardaygu hawsha u qabanayo.
- ☐ Mastarad ugu hay halka uu ardaygu aqrinayo.
- ☐ La socodsii hawlaha cashareed ee soo socda si ardaygu uga warqabo waqtiyada la iska doonayo.

- ☐ In gaaban u koobi hawlaha cashareed ee aad u dhaadheer si uu ardaygu malinwalba ula socdo, baruhuna u qiimeeyo malinwalba.
- ☐ Ku tababar ardayga in uu soo ban dhigi kara casharada adigoo uga bilaabaya in uu u soo bandhiho kooxo yar yar. Dabadeedna u ogolow in uu fasalka oo dhan u soo ban dhigaa.
- ☐ U qeybi waraaqaha casharada mid mid.
- ☐ U soo hormari howlaha casharka kuwa ugu sahlan marka hore.
- ☐ U habee qeynuun ay wax u bartaan su'alana uga weydiyaan imtixaanada ku soo socda.
- ☐ Tixgeli ardayga meel ku qoranaya waqtiyada muhiimka ah ee la socda howlaha ku soo food leh.
- ☐ Ku sawir falaaro kutubada, sabuurada oo tusaya sida casharada iyo fikradahu isula xiriiraan. Isticmaal qariidado oo aad ku muujin karto casharada.

Dabeecad (Behavior)

- ☐ Waqti go'an imaw si aad malinta u tababushayso.
- ☐ La xiriiri ardayga arday kale oo edebta iyo waxbarashada ku wanaagsan.
- ☐ Dib u habee sharciyada fasalka u taagan ee takooraya ardayga (u ogolow in uu qaato waqtiyo gaaban ee nasasho ah ardayga aanan u adkaysan karin waqtiyada dheer)
- ☐ Isticmaal calamado aanan qeylo ama hadal ahayn marka uu ardaygu shrciga jebiyo.
- ☐ Si dhiira gelin ah wax ugu sheeg marka ardayga sharciga jebiyo (ardayga xasuusta liidata leh ee aanan soo xasuusan in uu qalin la yimaado, ku dhiira geli malinta uu qalinka xasuusto)
- ☐ Dhiirageli si joogta ah marka ardaygu wax wanaag sameeyo.
- ☐ U hel qorsho shaqsi dabeecadeed u ah ardayga kartidiisa iyo xirfadiisa.
- ☐ Siyaadi dhiiragelinta ardeyga mar walba iyo si joogta ah.
- ☐ U hel ardeyga meel nabad ah uu jogi karaa marka uu fasalka ka baxo dhibaato ama murugo daraadeed.
- ☐ U hel calaamado ama baaq aad ku ogeysiinayso ardeyga marka fal aadan raali ka ahayn falo.
- ☐ U dulqaado dabeecadaha aanan aad u liidan ee ardaygu ku kici karo.
- ☐ U hel xaal dabeecadaha ardayga samaynaya isaga oo aan is ogeyn. Tusaalo waxaa ka mid ah: ardayga qalinka la dhacaya miiska. U dhig cad yar oocalal ah oo ka celiya dhawaaqa.
- ☐ La soco dabeecad isbedelka ay sabab u tahay dawooyinka qadashadooda ama dabeecadaha yimaada marka ardayga muddo dheer dugsiga jooga. Xal u hel hadii loo bahan yahay.